**DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA**

# Xeer-nidaamiyaha 7aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

# Fasaxyada ay Xaqa u Leeyihiin Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

**Tusmo**

***1. Hordhac*** ........................................ ***1***
1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda ........................................ 1
1.2. Mabaa’diida Hagaya ........................................ 1
1.3. Waxa lagu maamulayo ........................................ 1
1.4. Erey-bixinta ........................................ 2
***2. Fasaxyada Guud ama Fasaxyada Qaran*** ........................................ ***3***
***3. Fasax-sanadeed*** ........................................ ***4***
***4. Fasaxa umusha iyo aabbaha loo dhaley*** ........................................ ***4***
***5. Fasax caafimaad iyo fasax naxariis*** ........................................ ***6***
***6. Fasax aan lacag la qaadan*** ........................................ ***7***
***7. Fasax Waxbarasho*** ........................................ ***7***
***8. Waqti fasax lagu magayo Waqti Horey Loo Shaqeeyey*** ........................................ ***8***
***9. Cabashooyinka iyo Rafcaannada*** ........................................ ***9***
***10. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha*** ........................................ ***9***

# 1. Hordhac

## 1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda

1.1.1. Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 31aad, Faqradda 31.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

1.1.2. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 waxaana sida ay sheegayso faqradda 1.4.1(f) marayaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka

1.1.3. Xeer-nidaamiyaha waxaa uu sameynayaa habraacyada ay tahay in ay raacaan Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo Hay'adda Loo Shaqeeyo marka ay sameynayaan Qiimeynta Sanadlaha ah ee Hawl-qabadka shaqaalaha rayidka ah ee dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

## 1.2. Mabaa'diida Hagaya

1.2.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa'diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga, ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka

1.2.2. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay mabaa'diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda saraakiisha la soo doortey, Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee ay wada shaqeeyaan, iyo dadweynaha.

1.2.3. Saraakiisha la soo doorto waa in ay mabaa'diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

1.2.4. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa shaqaaleyntooda ku saleysan tahay aqoontooda iyo kartidooda ka dib marka ay ka soo baxaan habraacyada soo-xulidda ee uu dhigayo sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaasha iyo dhabbe-tuseyaasha la xiriira.

## 1.3. Waxa lagu maamulayo

1.3.1. Marka laga reebo waxa xagga hoose lagu cayimey, xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa dhammaan shaqaalaha maamulka iyo maareynta ee Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee waqti buuxa iyo kuwa waqti gaaban shaqeeya ee Dowlad-goboleedka Jubbaland oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan

1.3.2. Xeer-nidaamiyahan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maaliyaddoodu ay bixinayaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

1.3.3. Xeer-nidaamiyahan laguma maamulayo:

a) Xubnaha ka tirsan ciidanka booliska, ciidamada amniga, iyo ciidamada qalabka sida
b) Xubnaha garsoorka
c) Saraakiisha la soo doorto
d) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada iyo xubnaha golayaasha ama Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha
e) Shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi
f) Shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo ah kuwo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
g) Shaqaalaha u shaqeeya qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixiyo adeegyo.

1.4. <u>Erey-bixinta</u>

1.4.1. Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, ereyadan waxaa ay yeelanayaan macnaha soo socda;

a) ***"Guddiga Rafcaanka***" waxaa loola jeedaa hay'adda uu Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u magacaabo in ay dhegeysato rafcaannada ka dhanka ah ciqaabaha anshax-marinta ah ama cabashooyinka ka dhasha go'aamo ay gaartey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

b) ***"Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e) ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

c) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin ee Dowladda.

d) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

e) ***"Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

f) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

g) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan oo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

h) ***Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo

Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo..

i) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

j) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

k) ***"Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

l) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

m) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka

## 2. Fasaxyada Guud ama Fasaxyada Qaran

2.1. Qofka shaqaalaha ah waa in uu xaq u yeeshaa fasax isaga oo qaadanaya mushaarkiisa oo buuxa waqtiyada fasaxyada guud ay jiraan. Taariikhda fasaxyada guud iyo tirada maalmaha fasaxyada xaqa loo leeyahay munaasabad kasta waa in uu Golaha Wasiirrada uu faafiyaa ka hor bilowga sanadka.

2.2. Haddii shaqaalaha looga baahdo in ay shaqeeyaan maalin fasax guud uu jiro, waa in la siiyaa waqti fasax ah oo loogu magayo waqtigaa hore. Shaqo la qabanayo maalin fasax guud uu jiro oo uu qofka shaqaalaha ahi uu qorsheynayo in uu u qaato fasax waqti u dhigma oo kaas loogu magayo si waafaqsan Qaybta 7aad ee Xeer-nidaamiyahan, waa in uu arrintaas horey u sii ansaxiyaa maareeyaha qofka shaqaalaha ah.

2.3. Haddii maalin fasax guud uu jiro ay ku soo beeganto maalin Jimce ah, shaqaalaha waxaa fasax la siinayaa maalinta xigta ee shaqo jirto.

2.4. Haddii uu qof shaqaale ah xanuunsado maalmo fasax guud uu jiro, ma jireyso maalmo kale oo dheeri ah oo la siinayo

2.5. Fasaxyada guud waa in lagu muujiyaa xaashida imaanshaha shaqada ee qofksa shaqaalaha ah si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 3aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Xaq-u-lahaanshaha Lacag-siinta ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Haddii qof shaqaale ah uu shaqeeyo maalin fasax guud uu jiro waa in tanna sidoo kale uu qofka shaqaalaha ah ku qoraa xaashida imaanshaha shaqada ee qofkaa shaqaalaha ah.

## 3. Fasax-sanadeed

3.1. Qof kasta oo Shaqaalaha ka mid ah waxaa uu xaq u leeyahay laba (2) maalmood oo ah fasax-sanadeed ah bil kasta oo uu dhammeysto isaga oo shaqaale ah. Fasax-sanadeedka waxaa uu ururayaa muddada tijaabada ah, haseyeeshee fasaxan waxaa la qaadan karaa keliya ka dib marka la dhammeysto muddada tijaabada ah.

3.2. Fasax-sanadeedka lama sii hormarsan karo ilaa maalmaha fasaxa ay qofka uga ururaan.

3.3. Marka laga reebo muddada tijaabada ah sida lagu caimey faqradda 3.1, fasaxa waxaa la qaadan karaa intii la doono iyo maalmihii la doono marka lagala heshiiyo Maareeyaha, iyo marka loo qaato si waafaqsan shuruudaha u yaalla Hay’adda Loo Shaqeeyo iyo marka uu qofka shaqaalaha ahi ay u urureen tiro maalmo ku filan si waafaqsan faqradda 3.2.

3.4. Codsiyada fasax-sanadeedka waa in qoraal lagu soo gudbiyaa ugu yaraan hal toddobaad ka hor iyada oo la adeegsanayo **Foomka Codsiga Fasaxa**(eeg Foomka 7.1 ee la socda Tilmaanta G ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda). Fasax-sanadeedka la qaato ka hor isaga oo aan la ansaxin waxaa loo xisaabinayaa fasax aanu qofku lacag qaadan, haddii uu Maareeyuhu ansaxiyo xaalado aan caadi ahayn oo jirey daraaddood ma ahee.

3.5. Foomamka fasaxa waa in ay saxiixaan qofka shaqaalaha ah, Maareeyaha qofkaa iyo Maareeyaha Qaybta Shaqaalaha.

3.6. Maalmaha Fasax-Sanadeedka waa in lagu muujiyaa xaashiyaha imaanshaha shaqada si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 3aad ee **Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda**: Xaq-u-lahaanshaha Lacag-siinta ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

3.7. Maareeyaha Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay’adeed ee Hay’adda Loo Shaqeeyo ayaa diiwaan ku haynaya fasaxyada u ururey ee uu xaqa u leeyahay qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha, oo eegayana codsiyada fasaxa iyo xaashiyaha imaanshaha shaqada ee bil kasta si uu u hubiyo in shaqaalaha ay xaq u leeyihiin fasaxa ay soo codsanayaan.

3.8. Fasax-sanadeed ururey ee aan lagu qaadan labada sano gudahooda waa la burinayaa.

3.9. Marna fasax laguma beddelan karo ‘lacag’, marka laga reebo marka uu ahaa fasax uu xaq u lahaa qof shaqaale ahaa oo shaqada laga joojiyey.

## 4. Fasaxa umusha iyo aabbaha loo dhaley

4.1. Shaqaalaha dheddigga ah waxaa ay xaq u leeyihiin 14 toddobaad oo is-xiga oo ah fasaxa umushakaas oo mushaar iyo gunnooyin buuxa ay u qaadanayaan si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Shaqaalaha Dheddigga ah ee haysta Qandaraas Muddo Go’an oo waafaqsan sida uu tilmaamayo Qodobka 22aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ayaa iyaguna leh xuquuq tan la mid ah.

4.2. Ma jiraan shuruudo ku xiran ama muddooyin shardi looga dhigayo in ay soo shaqeeyeen shaqaalaha dheddigga si ay xaq ugu yeeshaan fasaxa umusha ee lagu qeexay faqradda 4.1 ee Xeer-nidaamiyahan.

4.3. Ma xaddidna inta jeer ee shaqaale dheddig ah ay qaadan karaan fasaxa umusha ee ku qeexan faqradda 4.1, laakiin waxaa looga baahan yahay in ay u soo marto sida ay dhigayaanfaqradaha 4.7, 4.8 iyo 4.9 ee Xeer-nidaamiyahan.

4.4. Haddii ilmaha dhasha ah uu dhinto ka hor inta uusan dhalan ama ka dib marka uu dhasho, Shaqaalaha dheddigga ah waxaa ay xaq u yeelaneysaa fasax xannuun iyo fasax-naxariiseed kale oo dheeri ah sida ay dhigeyso faqradda 5.1 a) ee Xeer-nidaamiyahan.

4.5. Shaqaale Lab ah waxaa marka ilmo loo dhalo uu xaq u leeyahay lix maalmood oo fasaxa aabbaha loo dhaley ah oo uu lacagtiisana qaadanayo.

4.6. Fasaxa umusha iyo fasax aabbaha loo dhaley waxaa lala qaadan karaa fasax noocyo kale ah.

4.7. Shaqaalaha dheddigga ah waa in ay cidda ay u shaqeeyaan qoraal ku soo ogeysiiyaan ugu yaraan toban toddobaad ka hor marka ay doonayaan in ay qaataan fasaxa umusha iyaga oo adeegsanaya **Foomka Codsiga Fasaxa** (eeg foomka 7.1 ee la socda Tilmaanta G ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda).

4.8. Shaqaale dheddig ah oo dad soo ogeysiisey in ay dooneyso in marka ay dhasho ilmo ay qaadato fasaxa umusha waa in ay cidda ay u shaqeyso u soo gudbisaa caddeyn uu soo qorey dhakhtar caafimaad oo uu ku caddeynayo in haweeneyda shaqaalaha ah ay uur leedahay iyo taariikhda la filayo in ay dhasho.

4.9. Goorta uu bilaabanayo iyo goorta uu dhammaanayo fasaxa waalidka carruur u dhalatey waa in ay ka wada heshiiyaan Hay’adda Loo Shaqeeyo iyo qofka shaqaalaha ah.

4.10. Shaqaale dheddig ah oo fasaxa umusha u qaadata si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan waxaa ay xaq u yeelaneysaa in ay ku soo noqoto isla jagadeedii iyo heerka mushaarkaay ku shaqeyneysey ka hor intii aaney qaadan fasaxa umusha.

4.11. Inta uu u socdo fasaxa umusha ayaa shaqaalaha dheddigga ah waxaa u sii ururaya fasaxyada kale ee ay xaqa u leeyihiin.

4.12. Haddii qofka shaqaalaha ah uu welwel ka qabo caafimaadka shaqaale dheddig ah oo dad soo ogeysiisey doonisteeda ah in ay qaadato fasaxa umusha, ama uu welwel ka qabo in qoftaasi shaqaalaha ahi ay awooddo in ay mas’uuliyahada shaqada ay ka soo bixi karto, marka hay’adda loo shaqeeyo waxaa ay qofka shaqaalaha ah ka codsaneysaa in ay la tashato takhtar caafimaad oo go’aamiya sida qofkaa shaqaalaha ah uu caafimaad ahaan ugu sii negaan karo shaqada. Tallaabada xigta ee la qaadayo waxaa ku talinaya takhtarka caafimaad ee hawshaa u habboon; haseyeeshee qofka shaqaalaha ah waa in uu oggolaansho caafimaad uu soo siiyaa takhtarka caafimaadka taas oo si cad u sheegeysa in qofkaa shaqaalaha ah uu qaban karo shaqadaa.

4.13. Maareeyaha Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ayaa diiwaan ka sameynaya fasaxyada Umusha iyo Aabbaha loo dhaley ee Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha, si uu eego codsiyada fasaxa oo uu uhubiyo in shaqaalaha ay xaq u helaan fasaxa ay soo codsanayaan.

# 5. Fasax caafimaad iyo fasax naxariis

5.1. Qofka shaqaalaha ah waxaa sanadkii la siin karaa fasax 12 maalmood oo la shaqeeyo ah oo ay lacagtiisuna u socoto sababahaan soo socda daraaddood:

a) Xannuun ku yimaada qofka shaqaalaha ah, oo uu xaqiijiyey takhtar caafimaad.

b) Geeri ama xanuun ku yimid xubin qoyskiisa/keeda ka mid ah (waalid, xaas, carruur), oo uu xaqiijiyey takhtar caafimaad.

c) Guurka qofka shaqaalaha ah ama guurka ilmo uu dhaley qofka shaqaalaha ah.

d) Sababo kale oo naxariiseed ka dib marka uu ka oggolaado Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo.

5.2. Dokumentiyada xaqiijinaya arrinta fasaxa lagu bixiyey waa in Hay'adda Loo Shaqeeyo lagu gaarsiiyo laba toddobaad gudahooda marka ay arrintu dhacdo haddii kale fasaxa noocaas ah waa in loo tiriyaa in uu yahay fasax aan lacag la qaadan ama laga jarayo fasax-sanadeedka u ururey.

5.3. Fasaxa caafimaadka ee aan la qaadan waxaa loo rari karaa sanadka xiga, laakiin marna qofka looma oggola in uu urursado fasax-caafimaad oo ka badan 30 maalmood. Fasaxa caafimaadka ee ururey ee qofka ka maqan waa in aan lacag lagu siin qofka shaqaalaha dhammaadka Qandaraaska Shaqada, waana in aaney marna noqon kuwo 'lacag ahaan loo qaato'.

5.4. Marka qof shaqaale ah uu shaqada uga maqan yahay xanuun ama dhaawac, qofka shaqaalaha ah waa in uu:

a) Soo ogeysiiyaa maareeyaha uu tooska u hoos tago ka hor 9:00 subaxnimo maalinta ay la halmaasho ama ugu yaraan hal saac ka hor waqtigii ay ahayd in uu bilaabmo kaltalkii shaqada uuka lahaa;

b) Waraaq caafimaad kala yimaado Takhtar caafimaad oo diiwaangashan haddii muddada uu fasaxa caafimaad ku maqan yahay uu ka badan yahay hal maalin, haddii kale maqnaanshahaa waxaa loo tirin doonaa in uu yahay fasax aan lacag qofku u socon.

c) Buuxiyo foomka fasaxa ee u habboon marka uu shaqada ku soo noqdo.

5.5. Qof shaqaale ah looma oggola in uu fasax ahaan uga maqnaado shaqada sababtu waxa ay doonto ha ahatee isaga oo aan soo ogeysiin maareeyaha uu sida tooska u hoos tago. Haddii ay taasi dhacdo, marka laga soo tago in muddadaa uu maqan yahay laga goynayo mushaarka, qofka shaqaalaha ah waxaa sidoo kale laga qaadi karaa tallaabo anshax-mairn ah oo waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 5aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowadda: Anshaxa iyo Wax-ka-qabashada Anshax-xumada.

5.6. Maalmaha Fasaxa Caafimaadka iyo Fasaxa Naxariista waa in lagu muujiyaa xaashiyaha imaanshaha shaqada si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 3aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Xaq-u-lahaanshaha Lacag-siinta ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdda.

5.7. Maareeyaha Qaybta Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa haynaya diiwaanka xogta Fasaxa Caafimaadka iyo Fasaxa Naxariista ee Qofka Shaqaalaha ah U ururey ee uu xaqa u leeyahay, waxaana uu eegayaa codsiyada fasaxa iyo xaashiyaha imaanshaha shaqada si uu u hubiyo in qofka shaqaalaha ah uu xaq u leeyahay fasaxa uu soo codsanayo.

# 6. <u>Fasax aan lacag la qaadan</u>

6.1. Fasaxa aan lacag la qaadan waxaa lagu bixin karaa keliya xaalado gaar ah ka dib marka uu codsi qoraal ah uu qofka shaqaalaha ah u soo gudbiyo maareeyaha uu hoos tago.

6.2. Maqnaanshaha aan qiil loo haynin waa in laga soo qaadaa fasax aan lacag la qaadan ama laga jaraa fasax-sanadeedka uu qofku xaq u leeyahay.

6.3. Codsiyada fasaxa aan lacag la qaadan waa in qoraal ahaan loo soo gudbiyaa ugu yaraan hal toddobaad ka hor iyada oo la adeegsanayo **Foomka Codsiga Fasaxa**(eeg Foomka 7.1 ee la socda Tilmaanta G ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda).

6.4. Fasaxa aan lacag la qaadan waa in lagu muujiyaa xaashida imaanshaha shaqada ee qofka shaqaalaha ah si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 3aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Xaq-u-lahaanshaha Lacag-siinta ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

6.5. Maareeyaha Qaybta Shaqaalaha ee Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa haynaya diiwaanka xogta Fasaxa Aan Mushaarka La Qaadan ee Qofka Shaqaalaha, waxaana uu eegayaa codsiyada fasaxa iyo xaashiyaha imaanshaha shaqada si uu u hubiyo in qofka shaqaalaha ah uu xaq u leeyahay fasaxa uu soo codsanayo

6.6. Inta lagu jiro muddada fasaxa aan lacagta la qaadan, qofka shaqaalaha ah uma ururayaan fasax iyo gunno (faa'iido) kale.

# 7. <u>Fasax Waxbarasho</u>

7.1. Shaqaalaha raba in ay koorso waxbarsho waqti buuxa u baahan ay aadaan waxaa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo ay qoraal kaga soo codsanayaan fasax waxbarasho oo ugu badnaan 2 sano ah. Fasaxa waxbarashadu waa fasax aan lacag la qaadan.

7.2. Fasaxa waxbarashada waa in ay ansaxiyaan Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Fasax waxbarasho waxaa loo ansaxin karaa keliya koorsooyinka u habboon Hay'adda Loo Shaqeeyo oo kobcin xirfadeed qofka shaqaalaha u siinaya si waafaqsan yoolalka Hay'adda Loo Shaqeeyo.

7.3. Qof shaqaale ah oo qaatey fasax aan lacag la qaadan muddo ka badan 12 bilood xaq uma laha in uu ku soo noqdo isla jagadiisii in ay jagadii bannaan tahay ma

ahee. Jagada uu qofka shaqaalaha ah ku soo noqonayo waxaa ay noqon kartaa keliya heer darajo iyo mushaar oo la mid ah kuwii markii u bilaabayey fasaxa waxbarashada.

7.4. Qofka shaqaalaha ah ee qaadanaya fasax waxbarasho oo aan lacag la qaadan oo muddadiisu ka yar tahay 12 bilood waxaa uu xaq u leeyahay in uu ku soo noqdo isla jagadii dhammaadka fasaxa. Muddadaas inta lagu jiro jagada waxaa lagu buuxin karaa qaab sii-haye ah oo waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 1aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Shaqo-qorista, Dalacsiinta iyo Beddelaadda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

7.5. Inta lagu jiro muddada fasaxa waxbarashada qofka shaqaalaha ah uma ururayaan fasax iyo gunno (faa'iido) kale.

7.6. Shaqaalaha qaadanaya fasax waxbarasho oo aan lacag la qaadan waa in macluumaadkaas la geliyaa Hannaanka Maareynta Maaliyadda si loo joogteeyo xogta qofka shaqaalaha ah iyo si loogaga shaqeeyo mushaarka iyada oo la adeegsanayo Foomka Macluumaadka Qofka Shaqaalaha ah (Eeg **Dokumentiga 13aad**, ee la socda Tilmaanta A ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda).

# 8. Waqti fasax lagu magayo Waqti Horey Loo Shaqeeyey

8.1. Waqti fasax lagu magayo waqti hore loo shaqeeyey, waxaa loo qaadan karaa:

a) saacado la shaqeeyey oo ka badan saacadihii caadiga ahaa oo loo ansaxiyey si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 4aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Shaqada ka Baxsan Saacadaha Caadiga ah ee Shaqada

b) shaqada la shaqeeyey maalin fasax guud ah si waafaqsan faqradda 2.2 ee Xeer-nidaamiyahan

c) saacado laga shaqeeyey maalin Jimce ah oo uu codsadey Madaxa Waaxda oo ka ambaqaadaya faqradda 2.1.6 ee Xeer-nidaamiyaha 3aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Xaq-u-lahaanshaha Lacag-siinta ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

8.2. Codsiyada waqti fasax ah oo lagu magayo waqti horey loo shaqeeyey waxaa lagu soo gudbin karaa qoraal ugu yaraan hal toddobaad ka hor iyada oo la adeegsanayo **Foomka Codsiga Fasaxa** (eeg Foomka 7.1 ee la socda Tilmaanta G ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda).

8.3. Waqtiga fasaxa lagu magayo waqti kale oo la shaqeeyey waa in lagu muujiyaa xaashida imaanshaha shaqada ee qofka shaqaalaha ah si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 3aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Xaq-u-lahaanshaha Lacag-siinta ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

8.4. Maareeyaha Qaybta Shaqaalaha ee Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa diiwaan ku haynaya fasaxyada lagu magayo waqti kale oo la shaqeeyey ee uu xaqa u leeyahay qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha, oo eegayana codsiyada fasaxa iyo xaashiyaha imaanshaha shaqada ee bil kasta si uu u hubiyo in shaqaalaha ay xaq u leeyihiin fasaxa ay soo codsanayaan.

# 9. Cabashooyinka iyo Rafcaannada

9.1. Qofka shaqaalaha ka tirsan ee aan ku qancin go'aan ka qaadatey Hay'adda uu u Shaqeeyo oo la xiriira arrimo ku saabsan shaqaalenimada qofka, ama amar ay siiyeen Maareeye ama Hay'ad Loo Shaqeeyo, waxaa uu Guddiga ka codsan karaa in uu baaro arrintan. Xubnaha Guddiga ayaa dhisaya Guddi Rafcaanno oo madax-bannaan oo eega kiiska oo ka soo bixiya fikir taageeraya Hay'adda Loo Shaqeeyo ama mid taageeraya Qofka Shaqaalaha ah. Haddii ay ku habboon tahay Guddigu waxaa uu cayimayaa tallaabo ay tahay in ay qaaddo Hay'adda Loo Shaqeeyo si ay wax uga qabato cabashada.

# 10. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha

10.1. Anniga oo adeegsanaya awoodaha ka Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland la igu siiyey Madaxa V, Qodobka 19aad, Faqradda 19.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo Madaxa VIII, Qaybta 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, waxaan soo saarey Xeer-nidaamiyahan oo dhaqangelaya taariikhdan soo socota.



Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya